



# Wararkii ugu dambeeyey xanuunka Coronavirus

## PPS: War cusub oo muhiim ah

Gacaliye Waalid iyo Shaqaalaha PPS,

Iyada oo uu kordhayo tirada la xaqijihey ee caabuqa COVID-19 dadka u soo dhacay Gobolkan Oregon, oo ay ka mid yihiin tusaale ahaan Degmada Multnomah, [Guddoomiye Brown waxa ay ku dhawaqday tallaabooyin](#) cusub caawa oo ku saabsan ururadii kooxaha aha iyo bulshada. Waxa naga go'an in ay sii furnaadaan iskuuladeenu iyaga oo nabad ah. Marka la eego tallaabooyinkani caawa la soo saaray oo lagu yareynayo sidii aanu u iman fursad uu fayriskani ku faafo, **waxaan go'aansanay si ka hortago ah inaan bilowno in aan joojino munaasabadihii ardayda faraha badani iskugu imanayeen, dadka waaweyn, iyo wadajirka xubnaha bulshada.** Tallaabadii lama xiriirto bukaanada la saadaalinayo. Waqtigani xaadirka ah, ma jiraan bukaano la saadaalinayo oo ah Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Waxaa la joojihey iminka laga bilaabo hawlihii aan muhiimka ahayn ee ku saleysnaa iskuulada, laga bilaabo maalinta Khamiista ah, Maarsu 12, iyada oo sidaas ayey u xirnaanayaan muddo 30 maalmood ah. Waxaa ka mid ah **joojinta dhammaan munaasabadihii iyo hawlihii ku salaysnaa iskuulka, socdaaladii gaagaabnaa ee ka baxsanaa iskuulada, munaasabadihii iyo siminaaradii shaqaalaha lagu horumarinayey.** Hawlihii ku saabsanaa ciyaaraha, waxa aan raaceynaa tilmaamaha cusub ee goboolka kaasi la diidayo in. Ia bixiyo ogolaanshaha galitaanka munaasabadaha ku salaysan iskuulada, iyada la reebayo shaqaalaha muhiimka ah iyo warbaahinta aqoonsiga haysata. Liiska hawlaha ay saameysay waa ay sii kordhi doonaan marka aan la sii shaqeyno hay'adaha aan iskaashano iyo daneeyaasha maalmaha soo socda. Wixii cusub ee soo kordha mar walba waan idinla socodsii doonaa marka aan qaadano go'aanadaasi. we make those decisions.

Waxaan idii cadeyneynaa in aanu qaadeyno tallaabo kasta oo suurtagal ah, sidaas awgeed waxa aanu sii wadi doonaa in aanu dhammaan ardaydeena siino waxbarasho tay'adeedu aad u sareyso iyo waliba in iskuuladeenu ay sii furnaadaan.

Waxa aanu ognahay in go'aankani uu saameyn doono iskuul kasta oo bulshadeena ka mid ah, iyada oo aan ognahay munaasabado fara badan, bandhigiyadii ay qabanayeen ardaydu, iyo ururadii kale ee la iskugu imanayey ee aan joojineyno ee iskuulada kuwaasi oo ardayda iyo qoysasku ay sugayeen sanadka oo dhan. Hakinta munaasabahani waxa ay la jaanqaadeysaa tallooyinka ay bixinayaan hay'adaha caafimaadka, iyada oo aan rumeysanahay inay tahay tallaabo mas'uuliyada iyo daryeel xambaarsan in la qaado waqtigani. Waxa aan ka shaqeyn doonaan sidii loo qorsheyn lahaa safarada, loo qabanqaabin lahaa munaasabadaha, iyo kuwa kale ee ka mas'uulka ah hawlaha ay saameysay. Haddii marka aanu siino ogolaanshaha xubnaha bulshada (tusaale, shirarka Golaha Waxbarashada), waxa aan rajeyneynaa idinka siino dhinaca online in laga daawado iyada oo aan hadda raadineyno badiilo kale, oo ay ka mid yihiin maqal iyo muuqaal la iska arko shirarka, sidii loo sii wadi lahaa hawlaha iyo maamulka dugsiyada degmada.

Nabadgelayda, caafimaadka iyo fayo-qabka ardaydayada iyo shaqaaluhu waa mudnaantayada koowaad. Wixaan sii wadi doonaa in aan si dhow ula shaqeyno hay'adaha wada shaqeyntu naga dhaxayso ee hay'adaha caafimaadka dadweynaha si loo yareeyo fiditaanka xanuunka coronavirus-ka iyo in aan carqaladi galin iskuulada iyo ardayda labadaba. Wixaan sidoo kale sii wadi doonaa muhiimada ay leedahay in gacmaha la dhaqo sidii loo xoojin lahaa iskuulada. Shaqaalahayaga qaabilan nadaafadu wixaan sii wadi doonaan inay mudnaanta koowaad siyaan sidii u nadiifin lahaayeen oogada fasalada iyo meelaha ay ardaydu iskugu timaado. Iyada oo aan anakuna xaqijineyno inay aanu siino wixii agab ah ee wax lagu nadiiyo aanu siino.

Ardayda, qoysaska, iyo qof kasta oo ka mid ah bulshadeena wixaan ugu wanaagsan ee uu nagu caawin karaa sidii uu ugu dadaali gali lahaa in ay si joogta ah u dhaqaan gacmaha, daboolaan afkooda marka aad qufaceysaan ama hindhiseysaan iyada oo aad isticmaaleysaan qalabka lagu nadiifyo gacmaha(sanitizer). Qolyihina isku arka calaamadaha hargabka ama ifilada waa in aad guriga iska joogtaan, kaliya aad ku soo noqotaan iskuulka ama shaqada marka aad ogaataan in calaamadihi ay idinka tageen 24 saacadood. Haddii aad ka walaacdoo calaamadahaasi, fadlan waxaad la tashataa dhakhtar.

Ugu dambeiyntii, fariimaha ku saabsan xanuunka COVID-19, agabyada ,linkyada hay'adaha caafimaadka dadweynaha iyo wixii su'aalo/foomka faaloooyinka waxaad ka heli kartaa marka aad booqoto halkani [pps.net/coronavirus](https://pps.net/coronavirus).

Waxaan idiinka mahadcelinaya wada shaqeynta iyo fahamkiina waqtigani adag ee aan ku jirno. Wixaan sii wadi doonaa in aan idiiin soo gudbino wixii tallo ah ee ka yimaada hay'adaha caafimaadka dadweynaha Oregon, Waaxda Waxbarashada, iyo Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka Oregon. Fadlan waxaad ogaataa fariintani iyo go'aanada waatigan la gaadhay waxaa iska kaashaday iskuulada ugu ballaaran Degmooyin fara badan oo Gobolka Oregon ah,kuwaasi oo ay ka mid yihiin Dugsiyada Degmada Beaverton,Dugsiyada Degmada Eugene, Dugsiyada Degmada Hillsboro, Dugsiyada Dadweynaha Portland, iyo Dugsiyada Dadweynaha Salem-Keizer. Wixaan uga mahadcelineynaa iskaashigooda waqtiani. Wixaan dhammaan si wada jir ah u wadaageynaa sida aanu daneyneno caafimaadaka iyo nabadgelyada ardaydeena, shaqaalahay iyo bulshadeenaba.